## Sidee buu ii caawin karaa khabiirka manaafacaadka?

Khabiirrada manaafacaadka waa qof aqoon u leh manaafacaadka dowladda iyo kuwa gaarka ah ee ay heli karaan dadka qaangaarka naafada ah iyo dadka waayeelka ah.

WAA BILAASH

Adeegyada khabiirrada manaafacaadka waa lacag la'aan.

Khabiirrada manaafacaadka waxay dadka si isku mid ah u siiyaan macluumaad. Waxba ma iibiyaan oo ma jiraan shirkado lacag ku siiya. Ujeedkoodu waa in ay kaa caawiyaan baahiyadaada.

Khabiirrada manaafacaadka waa dad ilaalinaya macluumaadkaaga gaarka ah.

## La hadal khabiirka manaafacaadka ee deegaankaga

Aging and Disability Resource Center

### Nagala soo xiriir

555 Example Street Name
City Name, WI 55555

Monday–Friday
8 a.m.–4:30 p.m.

1-844-WIS-ADRC
(1-844-941-2372)

name@namecounty.gov
namecounty.gov/adrc

**Sawiro calaamadda**
FindMyADRC.org



# Barnaamijka Khabiirka Manaafacaadka

(Benefit Specialist Programs)

- Waa Bilaash
- Eex-la'aan
- Qarsoodi

WISCONSIN DEPARTMENT of HEALTH SERVICES
P-03712ASO (03/2025)

# Inay lacag kuu baaqato. Inaad noloshaada isku filnaato.

Khabiirka manaafacaadka wuxuu kuu raadsan karaa barnaamijyo iyo siyaabo ay lacag kuugu baaqato oo wuxuu kuu ilaalinayaa madaxbannaanidaada.



## Hel caawimaad ah waxyaabaha soo socda iyo ka badan.

- Dakhliga naafanimada iyo hawlgabka
- Kharashaadka
- Ceymiska caafimaadka
- Guriyeyn iyo lacagta korontada

## Yaa la kulmi kara khabiirka manaafacaadka?

**Waxa uu khabiirka manaafacaadka ku caawin karaa:**

- Haddii aad tahay qaangaar ah naafoama aad gaartay 60 jir iyo ka weyn.
- Haddii aad ku nooshahay Wisconsin.
- Haddii aad masuulka ka tahay qof xaq u leh.

## Hel talada khabiirka.

**Khabiirka manaafacaadka waxa uu kugu caawin karaa:**

- In uu magacaaga kuugu qareemo meelo kale.
- In uu kuu codsado barnaamijyo ay kuugu baaqan doonaan lacag.
- In uu racfaan kuu dalbo marka laguu diido lacagta naafada, caafimaadka ama daawada, ama manaafacaad kale.
- In aad fahamto fursadaha ceymisyada caafimaadka, barnaamijyada ay lacagtu kuugu baaqaneyso, ama wixii ah xal kale oo la xiriira dhibaatooyin.
- In laguu gudbiyo qareen markii ay noqoto lagama maarmaan.

*"Khabiirka manaafacaadka waxa uu igu caawiyey in aan helo siyaabo aan ku yareeyo kharashaadkeyga si aan isaga bixiyo daawada."*
*–Macmiil*

*Waxyaabaha fududeynaya dhaqaaqa, waraaqaha oo u qoran si kale, iyo ballamaha saacadaha aan la shaqeyn waxaa la heli karaa marka la soo codsado. Fadlan taleefan noo soo dir si laguugu diyaariyo turjubaan ama qoraalka shaashadda.*